Victorian Equal Opportunity & Human Rights Commission

Macluumaadka Takoorida

> Ogsoonow xuquuqdaada, xali dacwooyinkaaga

Takoorid

Sharciga reer Fiktooriya wuxuu ka xafidaa muwaadiniinta takoorida, faraxumaynta, dhibaataynta, iyo ceebaynta la xiriirta diinta iyo jinsiyada.

Takoorida waxay ula dhaqantaa qofka si aan wanaagsanayn sabab la xiriirta:

- jinsiyada, midabka, asalka, dhalashada, farcanka iyo qawmiyada
- aaminsanaanta ama ka qaybqaadashada xarakaadka diimeed
- Iin, jiro ama dhaawac, ay ku jirto iin la xiriirta shaqada
- waalidnimada, daryeel ahaan, tusaale ahaan waxay masuul ka yihiin daryeelida carruurta ama xubnaha kale ee qoyska
- da'da, ama da' weyn ama yar, ama guud ahaan da'da
- sinjiga
- xarakaadka shaqada, tusaale ahaan waxay weydiiyaan su'aallo ama waxay soo jeediyaan welwel ku saabsan xuquuqdooda ama waxay mudan yihiin shaqada
- xarakaadka shaqada, sida xubin ka ahaan urur ama sida ururada shaqaalaha ama ka qaybqaadashada xarakaadka shaqaalaha, go'aansashada in aan laga qaybgelin urur
- muuqaalka jireed, sida dhererka, miisaanka, baaxada, timaha ama calaamadaha astaamaha dhalashada
- uurka iyo naasnuujinta
- xarakaadka galmood ee sharciga ah
- galmada qofku ka hello ama aqoonsiga waxa qof yahay lab iyo dhadig, ama wada noolaashaha nin iyo naag, wada noolaanshaha laba nin, wada noolaanshaha laba naagood, labeeb, qof loo bedelay sinjiguu ahaa maahee mid kale, qof iska dhiga sinji aanu ahayn
- xaallada guurka, qof la qabo, la furay, aan la qabin, ama ku nool guur la'aan
- aaminsanaan siyaasad ama ka qaybqaadashada xarakaad siyaasadeed, aanu ka qaybqaadan xarakaad siyaasadeed sinaba
- xiriir la yeelasho qof leh, ama loo haysto, mid ka mid ah dabeecadahaan shakhsiyeed.

Ficilka faraxumayntu waa ka soo horjeedaa sharciga. Taas waxaa ka mid noqon karta samaynta hadal laga sheego qof, emailo muujinaya galmood, taabasho aan la casumin ama codsi galmood, ama muujin aan haboonayn oo qalab galmood la xiriira.

Marka takooridu sharciga ka soo horjeedo

Fiktooriya gudaheeda takooridu waa ka soo horjeedaa sharciga markay ka dhacdo:

- degaanka
- naadiyada
- waxbarashada
- shaqada, sida mid waqti dhiman ah, mid waqti buuxa ah, mid marmar ah, shaqaalaha tijaabada iyo kunturaada, iyo weliba kuwa tababarka ku jira iyo kuwa shaqada wax ku barta
- badeecada iyo adeegyada
- dhul iib ah iyo ganacsi is dhaafsi
- dawlada Hoose
- cayaaraha.

Noocyada takoorida

Takoorida tooska ahi waxay dhacdaa marka qof loola dhaqmo si aan fiicnayn sabab la xiriirta dabeecad shakhsiyeed oo sharcigu xafiday darteed.

George ma aanu helin waraysi shaqo oo uu filayey inuu aqoonteeda leeyahay wuxuuna u malaynayaa inay tahay sabab la xiriirta qawmiyadiisa darteed.

Takoorida dadbani waxay dhacdaa marka qof walba loola dhaqmo si isku mid ah sabab la xiriirta hab-dhaqanka shakhsiyeed.

Maamulaha bakhaarka ayaa weydiiyey dhamaan macaamiisha laysamooda ka hor inta aanu ansixin baarista laakiin Ramesh ma haysto laysanka gaari wadida sababtoo ah waa indhoole.

Codsiyo macluumaad oo takoorid ah

Waa ka soo horjeedaa sharciga in la weydiiyo macluumaad la xiriira dabeecad shakhsiyeed oo la xafiday haddii loo isticmaali karo hab takoorid ah.

Waraysi la xiriira shaqo ayaa Ally lagu weydiiyey haddii la qabo iyo haddii ay qorshaynayso inay uur yeelato. In kasta oo ay tahay qofka ugu fiican booska, Ally ma aanay helin shaqadii.

Ceebayn

Ceebayntu waa dabeecad ku dhiirigelisa dadku inay nebcaystaan, aanay ixtiraamin, ama xumeeyaan shakhsi ama koox dad ah sababa la xiriira jinsiyad ama diin.

Taasna waxaa ka mid ah qoraal, hadal, online ama dabeecad jireed oo loola jeedo jinisyad ama koox diimeed taas oo dhiirigelisa in la quursado, la nebcaysto ama wax la yeello iyaga, khasaara loo geysto hantidooda, iyo in laga sameeyo dacwo beena oo ka soo horjeeda.

Waxay kaloo ka soo horjeedaa sharciga inaad ogolaansho siiso ama caawiso qof in uu ceebeeyo kuwa kale, sida qorista ama qaybinta macluumaad iyaga ku saabsan.

Dabeecadaha qaarkood waxa laga yaabaa in aanay ceebayn ahayn, haddii ay maangal yihiin ujeedo wanaagsana laga leeyahay, sida daabicida warbixin warbaahineed oo ku saabsan dabeecad jinsiyadeed. Hadalada qaarkood ama kaftan ku saabsan qofka jinsiyadiisa ama diintiisa waxaa laga yaabaa in aanay ahayn ceebayn, welise waxay noqon karaan takoorid haddii ay ka dhacaan mid ka mid ah sideeda jaho oo sharcigu daboolay, sida shaqada.

Dulminta

Dulmintu waa markaad qof dhibaato u geysato sababtoo ah waxay ka hadleen xuquuqdooda, waxay sameeyeen dacwad, ama waxay caawimeen in qof dacwad sameeyo. Dulmintu waa ka soo horjeeda sharciga.

Dacwad u gudbinta Commission

Haddii aad malaynayso in lagu takooray, lagu faraxumeeyey, lagu dulmay ama ceebeeyey, nala soo xiriir. Waxaan kuu soo diri karaa macluumaad ku saabsan habka dacwada. Haddii aanaan ku caawimi karin waxaan isku deyeynaa in aan kuu xawilo qof ku caawimi kara.

Waxaad kaloo samayn kartaa dacwad adiga oo noo soo diraya warqad ama email ama buuxinaya Foomka Dacwada ee Online-ka ah. Waxaad samayn kartaa dacwad aad ku qorayso afka aad door bidayso ama waa nasoo wici kartaa waxaanuna kaa caawin karaa inaad qorto dacwadaada. Waxba kugu kalifimayso inaad dacwad samayso umana baahnid garyaqaan si aad dacwad u samayso.

Commission-ku wuxuu isku deyi doonaa inuu ku caawimo si uu u xaliyo dacwada, laakiin kuuma hadlayno adiga, qofka ama ururka aad ka dacwoonayso.

Markaad soo qadintu dacwad waan kula xiriiri doonaa si aan kaagala hadalo dacwadaada waxaana laga yaabaa inaan ku weydiino macluumaad siyaada ah. Waxaa laga yaabaa in aan isku deyno in aan kaala hadalo in aad xaliso dacwada iyada oo laydin heshiisiinayo iyo sidaad u doonayso in lagu xaliyo khilaafka.

Victorian Equal Opportunity & Human Rights Commission

Guud ahaan, Commission-ku wuxuu la xiriiri doonaa ururka ama qofka aad ka dacwoonayso, wuxuuna siin doona koobiga dacwadaada wuxuuna weydiin doonaa in cidda la dacweynayaa wax ka tiraahdo. Waan kula socodsiin doonaa waxay ka yiraahdeen dacwadaada.

Xaalladaha qaarkood waxaa laga yaabaa in aan go'aansano in aan waxba laga qaban karin dacwadaada. Haddii taasi dhacdo waan kula xiriiri doonaa sababtana waan kuu sharxi doonaa.

Xaalladaha badankood waan kaa caawin doonaa adiga iyo qofka ama ururka aad ka dacwoonayso inaad isku daydaan inaad heshaan hab lagu xaliyo dacwada oo dib u heshiisiin ah. Dib u heshiisiintu waxay noqon kartaa mid la is hor-fariisanayo, telefoon lagu wada hadlayo ama email ama fariimo laysu marsiinayo dhexdhexaadiyaha. Dacwooyinka waxaa loo xalin karaa siyaalla badan, tusaale ahaan cudurdaarasho, bedelida siyaasada, tababarida shaqaalaha ama magdhow.

Wixii ku saabsan Commission

Victorian Equal Opportunity and Human Rights Commission waa hay'ad distuuri ah oo leh masuuliyaad sida waafaqsan saddex sharci:

- *Equal Opportunity Act 2010*
- *Racial and Religious Tolerance Act 2001*
- *Charter of Human Rights and Responsibilities Act 2006*

Adeega Commission-ka waxaa ka mid ah:

- khadka waxweydiinta oo lacag la'aana
- adeega xalinta khilaafaadka oo cadaalad iyo xaq ku dhisan
- macluumaadka iyo waxbarashada ku saabsan fursadaha sinaanta, ceebaynta la xiriirta diinta iyo jinsiga, iyo Charter of Human Rights and Responsibilities
- adeegyada waxbarashada, tababarada iyo la-tashiga.

Fadlan nagala xiriir macluumaadka ku saabsan Fursadaha Sinaanta iyo Xuquuqda Aadanaha.

Nala soo xiriir

Khadka wax weydiinta: 1300 292 153
Mutarjumiinta: 1300 152 494
Email: enquiries@veohrc.vic.gov.au

Level 3, 204 Lygon Street, Carlton Victoria 3053
Telephone: 1300 891 848
Fax: 1300 891 858
TTY: 1300 289 621
Websayt: humanrightscommission.vic.gov.au
Foomka dacwada ee online-ka ah: humanrightscommission.vic.gov.au/complaints

Victorian Equal Opportunity & Human Rights Commission

Waxaa daabacay Victorian Equal Opportunity and Human Rights Commission, Juun 2011.

AFEEF: *Macluumaadkaan waxaa loogu talagalay tusaale ahaan. Maaha mid bedelaya talada sharciga.*